

Macluumaadka Hagidda Dadweynaha

Dadweynaha Qaaliga ah, Waxaan ku raja weynahay in aad farriintan heshaan adinkoo nabad iyo caafimaad qaba inta lagu jiro xilligan uu dareenku jiro. Qaar badan oo naga mid ah waxay jecel yihiin in ay qoysaskooda caawiyaan inta lagu jiro COVID-19, gaar ahaan xiriddii iskuullada oo loo qaadan karo in la iskaba dhaafay waxbarashada iyo adeegyada kale ee aad muhiimka u ah.

Si aan dadweynaha u taageerno, waxaan uruurinay waxyaabo aan ku caawineyno qoysaska ay guryaha u joogaan carruurtii u aadi lahayd iskuullada- oo waxaa ka mid ah waxbarasho intarnetka ah iyo baahiyo kale oo muhiim ah, sida cuntada.

Waxaan bilownay [bog cusub](#) oo laga heli doono macluumaad oo waxaan si joogto ah dadka oo dhan ugu soo direynaa farriimo ugu imaanaya boostada intarnetka, sidan tan oo kale. **Hoos ka eego saddex waxyaabood oo aan toddobaadkan kuu soo helnay.**

Waxaan kaa codsaneynaa in aad macluumaadkan la sii wadaagtaan qoysaska aad la xiriirtaan. Fadlan sii raadiya waxyaabo dheeraad ah ama macluumaad si ay qoysaskuna u caawin karaan carruurtooda. Waxaan sidoo kale ognahay in aad inta badan la shaqeysaan qoysaska aan ku hadlin afka Ingiriiska—oo qoraalkan hadda waxaan ku tarjunnay afafka Isbaanishka, Moong, iyo Soomaali.

Goobaha ardeydu ka qaadaneyso cuntada

Inta badan waxaad la shaqeysaan qoysas ay hayso cunto yaraan. Sidaad ogtihiin, maamulka iskuullada Minneapolis cunto ayey siinayaan dhammaan carruurta (18 iyo ka yar), iyada oo aan loo tixgelineyn kuwa iskuul dhigta iyo kuwa aan dhigan. [Goobaha iyo wakhtiyada cuntada waxaad ka heli kartaa halkan.](#)

Qoysaska deggen St. Paul, dugsiyada dadweynaha ee Saint Paul Public Schools ayaa sidoo kale ardeyda u haysa [goobo ay cuntada ka qaadanayaan](#) inta uu iskuulku xiran yahay.

Intarnet lacag la'aan ah ayaa loo hayaa qoysaska

Shirkadaha Comcast iyo USI Wireless ayaa si lacag la'aan ah u furay hawada intarnetkooda:

- [Comcast waxay labada bilood ee ugu horreysa intarnet lacag la'aan ah u haysaa](#) qoysaska xaq u yeesha intarnet qiimihiisu jaban yahay ama essential intarnet (caadi ahaan qiimihu waa \$9.95 oo loo sii geynayo canshuurta bil kasta).
- USI Wireless waxay la shaqeyneysaa intarnetka dadweynaha ee Magaalada Minneapolis Public Wifi (haddii gurigu ku yaallo ilaa 50-yaardi dhexroorka anteenada USI Wireless, xoogga leynku waa uu ku filan yahay in lagu isticmaalo kambuyuutar kasta sida Chromebook).

Kaalmo ay qoysasku ka heleyaan gobolka

[Liiskan waa macluumaadyo](#) - laga soo uruuriyey wakaalado badan oo ah maamulka gobolka, sida DEED, MDE, DHS, MDH, DHS, MHFA, maxkamadaha, iyo xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud—oo waxaa la socda macluumaad la xiriira cuntada, guryaha, iyo shaqa la'aanta.

Fadlan na soo ogeysii macluumaad iyo waxyaabo kale wixii aan kuu heli karno, oo nala soo xiriir sababtoo ah dhibka hadda jira waa mid na wada taabanaya.

Waxaan dadka oo dhan u rajeynayaa caafimaad iyo badqabid,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Osmaan Ahmed".

Osmaan Ahmed

Agaasimaha Wada-shaqeynta Bulshada

Fiiro Gaar ah: Haddii qoysaska (ama adigu) aad raadineysaan hab ku saabsan sida carruurta loogala hadlo COVID-19, [bartan internet ka](#) ah ayaad ka heli kartaan luuqado badan.

greatmnschools.org

1330 Lagoon Ave, 4th floor | Minneapolis, MN 55408



Sida Aad Noola Soo Xiriiri Karto

1330 Lagoon Ave
dabaqa 4-aad (4th floor)
Minneapolis, MN 55408
612-314-5596